


Badqabka tallaalka



Dhammaan tallaalada la oggolaaday waa kuwo baadqab ah.

Maamulka Cuntada & Daawada ee Mareykanka (FDA) wuxuu u baahan yahay tijaabinta badqabka oo adag kahor inta aysan ansixinin wax tallaal ah.

Tobanaan kun oo dad ah — oo ay ku jiraan dadka ku nool Oregon — oo kala leh asalo iyo da'aad kala duwan ayaa kaqeybqaatay tijaabinta tallaalka. Tijaabooyinkaani waxay hubiyeen in tallaaladu ay badqab yihiin oo ay cudurka ka difaacayaan dadka da'aha, jinsiyadaha iyo qowmiyadaha kala duwan leh.



Malaayiin Ameerikaan ah ayaa la tallaalay, oo baaritaannada adag ee socdaana ma muujinayaan walaac xagga badqabka ah.

Haddii aad qabto xaalado ku lamaan cudurka, tallaalada COVID-19 waa kuwo badqab leh oo si gaar ah muhiim kuugu ah adiga. Dadka qaba xaaladaha sida cudurka wadnaha, cudurka sambabka, sonkorowga iyo cayilka waxay u badan tahay inay aad ula jirraadaan COVID-19. Dadka qaba xaaladahaan ayaa sidoo kale qeyb ka ahaa tijaabooyinka tallaalka.




Tallaalada weli laguma tijaabin dadka uurka leh, balse khubarada ayaa rumeysan **in ay u badan tahay inay badqab u yihiin waalidka uurka leh iyo ilmaha aan dhalan labadooduba.** Maadaama dadka uurka leh ay u muuqdaan inay aad ula jirraadaan COVID-19 ayna aad ugu badan tahay in isbitaal la dhigo, **Xarumaha Xakameynta iyo Kahortagga Cudurrada (CDC) waxay ku talinayaan in tallaallada COVID-19 la siiyo dadka uurka leh.**



Tallaalada wali laguma tijaabin dadka naasnuujinaya. Khubaradu waxay u maleynayaan in tallaalku uusan halis ku ahayn ilmaha la naasnuujiyo, sidaas darteed dadka naasnuujinaya waxay dooran karaan in la tallaalo.

Haddii aad qabtid su'aalo ku saabsan is tallaalida, kala hadal daryeel-bixiyahaaga caafimaad.

Waxtarka tallaalka



Dhammaan tallaallada la oggolaaday waa kuwo waxtar badan leh. Tani waxaa loola jeedaa:

- Dhammaantood si fiican ayay u shaqeeyaan si ay kaaga difaacaan inaad aad ula jirato ama aad u dhimato COVID-19.
- Dhammaantood waxay muujiyeen difaac adag oo ka dhan ah noocyada COVID-19.
- Inta ay sii badanayaan tallaalkada la heli karo, ayaan si dhakhso leh dhammaanteen isku tallaali karnaa, oo nolol badan u badbaadin karnaa.
- Tallaalka kuugu fiican waa kan la heli karo marka la joogo tookadaada.

Johnson & Johnson: Hal qaadasho, ayaa loo oggolyahay dadka 18 jirka ah ama ka weyn

Moderna: Laba qaadasho, 28 maalmood u dhexeyso, ayaa loo oggolyahay dadka 18 jirka ah ama ka weyn

Pfizer - BioNTech: Laba qaadasho, 21 maalmood u dhexeyso, ayaa loo oggolyahay dadka 12 jirka ah ama ka weyn



Tallaalada COVID-19 iyo nudaha uurjiifka

Shirkadaha sameeya tallaalada waxay mararka qaarkood unugyada uurjiif ee la abuuray u adeegsadaan inay ku tijaabiyaan ama ka sameeyaan tallaaladooda.

Unugyada uurjiif ee la abuuray lama mid aha nudaha uurjiifka. Unugyada uurjiif ee la abuuray ayaa lagu kobciyaa shaybaarrada kadib markii laga soo qaado uurjiifka. Unugyada ayaa u tarma si aan xad laheyn. Shirkadaha sameeya tallaalada waxay adeegsadaan unugyada uurjiifka la abuuray: mid la kobciyay kaasoo laga soo qaaday uurjiif sannadkii 1972, iyo mid la kobciyay oo laga soo qaaday uurjiif la soo xaaqay sannadkii 1985.

Samaynta tallaalo ku tiirsan unugyadaan la abuuray uma baahna ilmo soo xaaqitaan cusub, maxaa yeelay unugyada ayaa si aan xad lahayn ugu korayo shaybaarka.

Wax unug uurjiif ah laguma isticmaalin **sameeynta** Tallaalada Pfizer-BioNTech ama Moderna.

Si kastaba ha noqotee, horaan markii la sameynayay, unug uurjiif ayaa la isticmaalay si loo tijaabiyo inay u shaqeynayaan sidii loogu talagalay.

Unug uurjiif ayaa lagu isticmaalay **sameynta** Tallaalka Johnson & Johnson, balse tallaalka la dhammeystiray kuma jiraan wax unugyo ah oo laga soo qaatay unugyada uurjiifka.